# Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha

## Soo Koobista Guud

carersactionplan.camden.gov.uk

Camden

# Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha

## Soo Koobista Guud

### Baaqayaga waxqabadka

Waxaan aaminsan nahay in ay habboon tahay in daryeeleyaasha la qiimeeyo oo la taageero. Daryeeleyaashu waxay aqoon ballaaran u leeyihiin, oo ay khibrad saf hore ka haystaan isticmaalka iyo la hadlidda adeegyada. Waxay badi ka war hayaan oo ay u doodaan xuquuqdooda iyo xuquuqda qofka ay daryeelaan, iyagoo dhex maaxa habsocodyo adag. Waxay badi yihiin xiriirka u dhexeeya adeegyada waxayna dhinac walba ka og yihiin nidaamka. Waxaan annagu isku hallaynaa daryeeleyaasha. Laakiin waxaan sidoo kale u baahan nahay in aan taageerno daryeeleyaasha, oo laga yaabo in ay wajahayaan caqabado iyaga gaar u ah. Qorshahan Waxqabadka Daryeeleyaasha (Carers Action Plan) ayaa bilow u ah.

Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha waxaa soo saaristiisa laga kaashaday oo dhinac taagnaa daryeeleyaasha, adeegyada daryeelaha ee maxalliga iyo bulshada, iyo shuraakada daryeelka caafimaadka iyo bulshada. Waxay ujeeddadiisu tahay in lagu hirgeliyo xeelad nidaamka oo dhan khusaysa oo loo muujiyo daryeeleyaasha, iyadoo la aqoonsanayo in daryeeleyaashu ay badi yihiin xajiyaha u dhexeeya shabakadda adeegyada iyo laamaha kaladuwan.

Qorshahan waxqabadka waxaa weliba loogu talagalay in uu dhaqdhaqaaq yeesho: waxuu matalayaa shaqo is bedbeddesha, mana aha xeelad dul taalla iskafaale boor leh oo aanay cidi eegin. Waa baaq waxqabad, iyadoo mudnaanaha, waxqabadyada, tallaabooyinka, iyo natiijooyinka wadajir loo soo saaray dhammaantood lagu abbaaro suurogelinta xaaladda lagu keenayo isbeddel iyo taageerada ay aad ugu baahan yihiin daryeeleyaashu.

Carers in Camden (Daryeeleyaasha jooga Camden) ayaa haysa macluumaadka lagu taageerayo qorshaha waxqabadka. Qaybtan waxaa lagaga hadlayaa qeexitaanka ama sharaxaadda daryeelaha aanan mushaarka lahayn; waxaa lagu muujinayaa xog ku saabsan daryeeleyaasha jooga Camden waxaana lagu xusayaa xuquuqaha daryeeleyaasha. Qaybta waxaa lagu qeexayaa sida loo soo saaray qorshaha waxqabadka, iyo cidda lala soo saaray; sida loo cabbiri doono horumarka laga gaaro qorshaha waxqabadka iyo qorshooyinka u yaalla guddiga iskaashiga daryeeleyaasha.

Sida loola xiriiro taageerada, haddii aad tahay daryeele aanan mushaar lahayn, ayaa sidoo kale laga heli karaa dhammaadka qaybtan.

### Ciddee ayaa ah daryeele (carer)?

Qeexitaannada caadiga ah ee daryeeleyaasha aanan mushaarka lahayn waxaa lagu sheegaa taageerada loogu talagalay dadka naafaysan, qaba cudur ama xaalad caafimaad oo waqti dheer, oo ay ka mid yihiin caafimaadka maskaxda, naafada waxbarashada iyo/ama isticmaalka xun ee maandooriyaha, duwanaanshaha neerfaha (neurodiversity), ama taageerada loogu talagalay dadka u baahan gargaar dheeraad ah marka ay da'a weyn gaaraan.

Waxaa adkaan karta in la isku tilmaamo daryeele. Waxaa laga yaabaa in daryeeleyaashu ay taageeraan xubin qoys, saaxiib, ama deris, qof ay xiriir la dhisteen, ama qof rafaad geli doona haddii aan la caawin. Mararka qaar dadku waxay tartiib tartiib ku qaadi karaan kaalinta daryeelaha marka qofka ay daryeelaan uu taageero dheeraad ah u baahdo waqti ka dib. Waxaa laga yaabaa in daryeeleyaashu ay taageeraan in ka badan hal qof ama ay taageero bixiyaan iyagoo laftigoodu ay helayaan daryeel iyo taageero. Waxaan rabnaa in la aqoonsado in daryeeleyaashu ay sameeyaan wax cajiib ah, iyo inaan ku faano!

Waxaa jira waajibaadyo ama masuuliyado sharciyeed oo lagu tiiriyo habka adeegyada qaanuuniga ah, sida Kawnsalka Camden iyo adeegga NHS, ay ula shaqeeyaan ama wax ugu qabtaan daryeeleyaasha aanan mushaar lahayn. Sharciga Daryeelka 2014 (Care Act 2014) ayaa ah sharciga qeexaya sida habboon in daryeelka bulsheed ee qaangaarka looga bixiyo England si loo wanaajiyo madaxbannaanida iyo wanaaqgabka dadka. Sharciga Daryeelka ayaa lagu aqoonsaday in taageeridda daryeeleyaashu ay u muhiim tahay sida dadka ay daryeelaan. Sharciga Daryeelka ayaa daryeelaha ku qeexaya, “qof qaangaar ah oo daryeel siiya ama ku tala jira in ay daryeel siiyaan qof kaloo qaangaar ah”.

Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha waxaa lagu abbaaray in diiradda lagu saaro mudnaanaha iyo waxqabadyada khuseeya daryeeleyaasha aanan mushaar lahayn, ama aanan rasmi ahayn. Kuwani waa daryeeleyaasha 18 jirka ah ama ka weyn ee daryeel siiya dad 16 jir ah ama ka weyn, oo aanan lacag ka helin adeegyada caafimaadka iyo daryeelka bulsheed, ama qofka ay taageeraan, taasoo laga siiyo kaalintooda daryeelka.

## Waxa ay falanqayntu noo sheegtay

Tirakoobkii ugu dambeeyey 14,605 qof oo Camden jooga ayaa isku tilmaamay ama isku aqoonsaday daryeelayaal. Waxaan og nahay in tirada daryeeleyaasha ee laga og yahay dhanka waaxda caafimaadka iyo daryeelka bulsheed ay tan ka hoosayso, iyadoo 1165 daryeeleyaal aanan mushaar lahayn oo keliya ay soo ogaatay waaxda Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka (Adult Social Care) sanadkii 2023. Waxaan rabnaa in daryeeleyaal dheeraad ah ay aqoonsadaan in ay daryeeleyaal yihiin, in aanay keli ahayn, iyo in ay jirto taageero ay xaq u leeyihiin. Marka aakhirka la gaaro, cilmibaarista hay'adda Carers UK ayaa lagu ogaaday in daryeeleyaasha aanan mushaar lahayn ee jooga England iyo Wales ay ku daraan £445 malyuun maalintii dhaqaalaha taasoo ah qiyaas ahaan £162 bilyan sanadkii. Qiimaha daryeelka aanan mushaarka lahayn wuxuu u dhigmaa NHS labaad oo ka jira England iyo Wales!

Xog ayaa lagu tilmaamay in dadka isku sheega daryeele ee jooga Camden, in ka badan saddex meelood hal meel ay ku shaqeeyaan shaqo u dhiganta waqti buuxa inta ay taageerayaan qofka ay daryeelaan, iyadoo boqolkiiba 53(%) ay is barbar wadaan masuuliyadaha daryeelka iyo maamulka shaqada caadiga ah ee daryeelaha laftigooda. Waxaan og nahay in daryeeliddu ay noqon karto masuuliyad culays saarta shucuurta, jirka iyo dhaqaalaha; iyadoo daryeeliddu ay keento daal xad dhaaf ah, iyadoo ay daryeeleyaasha laftigoodu mararka qaar u baahdaan daryeeleyaal, ama isku tiiriyaan qofka ay daryeelaan si ay iyagana u daryeelaan.

Camden gudaheeda, waxaan ku aqoonsan nahay in kaalinta daryeelka aanan loo eegi karin si gooni ah oo ay ku xiran tahay arrimo kale sida aqoonsiga qofka iyo baahiyaha caafimaadka iyo daryeelka bulshada ee iyaga gaar u ah. Waxaan nahay xaafad ay helitaanka guri nabad ah oo sugan, tirada badan ee dadka kelida ah iyo sinnaan la'aantu ay saameeyaan natiijooyinka wanaagqabka dadka degan xaafada, waxaana jirta in daryeeleyaal rubuc ka badan ay soo sheegaan in aanay caafimaad fiican ku sugnayn. Waxay tani gebi ahaan ka dhigan tahay in aan u baahan nahay in aan hubinno marka daryeele uu la soo xiriiro adeeg in ay habboon tahay in waayo fiican ay helaan, iyo in ay muhiim tahay in hore wax loo ogaado oo loo taageero.



# Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha

**Soo Koobista Guud**

## Sida loo xusay Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha

Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha waxaa loo xusay ama loo kala saaray labo qaybood. Qaybta koowaad waxaa ku jira **Qorshaha Waxqabadka** (hoos eeg). Qaybta labaad waxaa ku jirta warbixin ku saabsan **Carers in Camden (Daryeeleyaasha jooga Camden)**, oo ay ku jiraan macluumaadka aasaaska iyo fikirka ka dambeeya Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha. Qaybtan dambe waxaa lagaga hadlayaa qeexitaanka ama sharraxaadda daryeelaha aanan mushaarka lahayn; waxaa lagu muujinayaa xogta ku saabsan daryeeleyaasha jooga Camden waxaana lagu xusayaa xuquuqaha daryeeleyaasha. Qaybta waxaa lagu qeexayaa sida loo soo saaray Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha, iyo cidda lala soo saaray; sida loo cabbiri doono horumarka laga gaaro qorshaha waxqabadka iyo qorshooyinka u yaalla Guddiga Iskaashiga Daryeeeleyaasha ee Xaafadda.

Qorshaha Waxqabadka waxaa ku jira mawduucyada ay daryeeleyaashu muhiim ku tilmaameen. Waxaa kuwan loo kala faahfaahiyey shan mabaadii' daruuri ah oo lagu tiiriinayo taageerada loogu talagalay daryeeleyaasha, iyo dhinacyada mudnaan u leh waxqabadka. Hadallada toos looga soo qaaday daryeeleyaasha ayaa lagu daray Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha dhammaantiis. Qorshahan Waxqabadka Daryeeleyaashu waxuu isku beddeli doonaa sida aan wadajir hore ugu soconno in aan fulinno mudnaanaha daryeeleyaasha ee ka jira Camden.

**Qaybta I** ee qorshaha waxqabadka waxaa lagu qeexayaa **mabaadii'da taageeridda daryeeleyaasha**. Kuwani waa aasaasi waana in lagu tiiriyo wax walboo adeegyadu ay qabtaan si ay u taageeraan oo ay ula xiriiraan daryeeleyaasha. Waxaa loo arkaa in aanay kuwani is beddeli doonin. Mabaadii'du waa:

- **Isku aqoonsashada daryeele ayaa ah tallaabo daruuri ah si taageero loo helo.**
- **Daryeeliddu waxay asal ahaan ku xiran tahay xiriir qof lala leeyahay.**
- **Daryeeluhu waa qof shakhsi ah oo leh baahiyo iyo xaalad iyaga gaar u ah.**
- **Masuuliyadaha daryeelku waxay u baahan yihiin waqti iyo tamar.**
- **Adeegyada isku xiran ayaa daruuri u ah daryeeleyaasha.**

Qaybta II ee qorshaha waxqabadka waxaa lagu sharxayaa meelaha mudnaanta leh ee daryeeleyaashu ay sheegeen in ay habboon tahay in aan diiradda saarno. Marka macluumaad dheeraad ah la helo, ee shaqadu sii socoto iyadoo daryeeleyaasha laga qayb geliyo fulinta qorshaha waxqabadka, Qaybta II ayaa la cusboonaysiin doonaa si loo matalo fikradaha iyo waayaha tirada ugu suurogal badan ee daryeeleyaasha. Waxyaabaha mudnaanta leh waa:

- **Wadaxiriirka**
- **Macluumaadka iyo Talada**
- **Taageerada Caafimaadka Maskaxda**
- **Wadahadallada Daryeelaha (qiimaynada)**
- **Qorshaynta Xaaladda Degdegga / Mustaqbalka**
- **Caafimaadka iyo Ka Sii-daynta Isbitaalka**
- **Taageerada Daryeeleyaasha Da'da yar (Young Adult Carers) (YAC)**
- **Nasashooyinka Daryeeleyaasha**
- **Furnaanta/Helitaanka**
- **Taageerada Maaliyadeed iyo Sharciyeed**
- **Shaqada, Waxbarashada iyo Tababbarka**

**Raadracaha Waxqabadka** ee ku jira **Qaybta III** ayaa lagu faahfaahin doonaa tallaabooyinka lagu gaarayo meel walbo wax laga qabanayo. Tani way is beddeli doontaa inta aan la shaqaynayno daryeeleyaasha, waaxda caafimaadka, daryeelka bulshada, iyo ururrada bulshada si aan u helno xalal waxtar leh. Marka la dejiyo hababka hore loogu socon karo, waqtiyada lagu fulinayo ayaa loo qoondayn doonaa mid kastoo ka mid ah waxqabadyada. Raadraacaha waxaa sidoo kale ku jirta qayb loogu talagalay horumarka laga gaaray mudnaan kaste.

## Isla Xisaabtanka iyo Natiijooyinka

Si loo xaqiijiyo in masuuliyadda loo leeyahay Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha lagu wadaago ururrada oo dhan, Guddiga Iskaashiga Daryeeleyaasha ee Xaafadda ayaa la aasaasi doonaa kama dambays dhammaadka sanadka 2024. Guddiga waxaa ku jiri doona daryeeleyaal, Xubingoleyaal, iyo wakiillo sare oo ka kala socda Iskaashiga Xaafadda Camden (Camden Borough Partneship). Guddiga waxaa lagu xiri doonaa kooxaha kale ee go'aan gaara, sida Guddiga Caafimaadka iyo Wanaagqabka (Health and Wellbeing Board) iyo Golaha Baarista xeeldheer ee Caafimaadka iyo Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka (Health and Adult Social Care Scrutiny Committee), si loo xaqiijiyo in waxqabadyada looga oggolaan karo oo loogu mudnaan siin karo darajada ugu sarraysa.

Saddex jago oo cusub oo qayb ka ah Daryeelka Bulsheed ee Qaangaarka ee Camden, oo diiradda saaraya fulinta iyo hirgelinta qorshaha waxqabadka, iyo koox shaqo oo laamo badan oo khabiir ku ah khibradda oo hore u jira ayaa sii wadi doona in ay masuul ka noqdaan fulinta maalin walba ee waxyaabaha mudnaanta leh ee ku jira qorshaha waxqabadka, iyagoo la soconaya horumarka durdurrada shaqada (kooxaha hoose ee lagu abuuray waxqabadyo khaas ah) iyo hubinta kormeerka qorshooyinka. Kooxda shaqada (working group) ayaa warbixin u diri doona guddiga.

Marka laga hadlayo cabbiridda guusha, xeelad isku dhafan oo ku aadan qaababka waxqabadka ee natiijooyinka ee hadda ka kala jira Iskaashiga Xaafadda ayaa la qaadan doonaa, bedelkii laga abuuri lahaa qaab waxqabad natiijo oo gaar u ah daryeeleyaasha jooga Camden. Marka habkan la adeegsdo saamaynta tallaabooyinka ayaa gaari karta halka ugu ballaaran. Waxaa lagu tala jiraa in layliska barbardhigga loo isticmaalo qiimaynta salka ah ee machadka NICE ee lagu taageero daryeeleyaasha qaangaarka ah (NG150) dib loogu noqdo oo lagu cabbiro horumarka, iyo sidoo kale xeerarka tayada machadka NICE (QS200) iyo qaabka waxqabadka Nolosha Fiican ee Camden (Good Life Camden) si loo cabbiro horumarka iyo hammadyada si loo xaqiijiyo in daryeeleyaasha la qiimeeyo oo la taageero. Horumarka kuwan laga gaaro ayaa looga warbixin doonaa Guddiga Iskaashiga Daryeeleyaasha ee Camden.



## Nala soo xiriir

Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha ee buuxa ayaa ka turjumaya codka daryeeleyaasha, waayahooda iyo aqoontooda. Waxaa tan dhammaanteed hoggaamin doona daryeeleyaasha aanan mushaarka lahayn. Gaaritaanka iyo taageeridda daryeeleyaal dheeraad ah ayaa muhiim u ah wax walboo aan wadno in aan samayno.

Haddii aad doorbidayso in aad aragto nuskhadda internetka ee qorshahan waxqabadka: Waxaa jira websayd loogu talagalay Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha: **https://carersactionplan.camden.gov.uk**

Sida loola xiriiro taageerada ayaa laga heli karaa halkan **https://camdencarechoices.camden.gov.uk/support-and-advice-for-carers/**

Haddii aad qabto su'aalo ama ra'yicelin ku saabsan Qorshaha Waxqabadka Daryeeleyaasha, fadlan la xiriir:
**CamdenCareChoices@camden.gov.uk**





carersactionplan.camden.gov.uk

Camden